



XEER

Magaciisu yahay

Qoondaynta (Sharciga Gargaarka Ciidan ee Dowladda Federaalka Soomaaliya DFS) 2017

2^{DA} BILOOD EE 1^{DA} NOOFEMBAR 2017 ILAA 31^{KA} DISEMBAR 2017

AMAR KU MEEL GAAR AH

SHURUUCDA DOWLAD GOBOLEEDKA AH EE GALMUDUG

Qoondaynta (Sharciga Gargaarka Ciidan ee DFS) 2017

Xeer Sanduuqa Maaliyadda Mideysan loogaga qoondeynayo dhaqaale lagu bixiyo kharashaadka Dowlad Goboleedka Galmudugee Soomaaliya ee 2 bilood. laga bilaabo 1 Noofembar 2017 ilaa 31 Disembar 2017.

Ayaa uu Madaxweynuhu u soo saaray sida tan:

CUTUBKA KOOWAAD

QODOBBO HOR-DHAC AH

Qaybta 1aad: Magaca Xeerka iyo Waqtiga uu Dhaqan-gelayo

Amarkaan Ku-meelgaarka ah waxaa uu magaciisu yahay: “**Qoondaynta (Sharciga Gargaarka Ciidan ee DFS) 2017**” waxaana uu dhaqangeliyaa taariikhda la saxiixo.

Qaybta 2aad: Qeexid

Xeerkan dhexdiisa, haddii aaney xaaladdu macno kale u sameyneyn, ereyadaan iyo oraaahan soo socda waxaa ay yeelanayaan macnaha halkaan lagu siiyey:

“**Sanduuqa Maaliyadda Mideysan**” waxaa loola jeedaa sanduuqa ay ku mideysan yihiin dhammaan dakhliyada Dowlad-Goboleedka ee Galmudugee Soomaaliya, waxaana loo adeegsadaa in laga bixiyo lacagaha, sida ku qeexan Qaybta 4aad ee wareegtadan;

“**Gargaarka Militariga ee DFS**” waxaa loola jeedaa wareejinta lacagta Hal Milyan US Dollar (US \$ 1,000,000) oo ka yimid Dawladda Federaalka ee Soomaaliya si Dowlad-Goboleedka ee Galmudugah oo loogu talagalay qaymaynta kharashaadka qaarkood;

“**Golaha Wasiirrada**” waxaa loola jeedaa Wasiirrada iyo saraakiisha kale ee uu Madaxweynuhu u igmado in ay madax ka noqdaan wasaaradaha iyo wakaaladaha/hay’adaha muhiimka ah ee dowladda;

“**Madaxweynaha**” waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Dowlad-Goboleedka ee Galmudug ee Soomaaliya;

CUTUBKA LABAAD

QOONDEYMO

Qaybta 3aad: Lacagaha Laga Qoondeeyo Sanduuqa Maaliyadda Mideysan

Kharashaadka muddada u dhaxaysa **1^{da} Noofembar 2017 ilaa 31^{ka} Disembar 2017** waxaa Sanduuqa Maaliyadda Mideysan looga qoondeynayaa si waafaqsan ujeedooyinka iyo qaddarka (tirada) lagu muujiyey Jadwalka 1aad ee ku lifaaqan Xeerkan.

Qaybta 4aad: Xadidaadaha Kharashaadka

Iyada oo la raacayo Qaybta 22aad ee Wareegtada Maareynta Maaliyadda Maamulka ee 2017, marka laga reebo hawlgallada ku-meelgaarka ah ee maareynta lacagaha khasnadda, iyo kuwa waafaqsan xeerarka guud, waa in aan lacag laga bixin Sanduuqa Maaliyadda Mideysan, marka laga reebo sheyga lagu qeexay qiyaasaha Miisaaniyadda Caawin Milatari ee DFS ee Jadwalka 1, oo hadba wax loogaga beddelayo u kala-wareejinta lacagaha miisaaniyadda dhexdeeda iyo/ama lagu soo saaro Wareegto Qoondeymo Dheeri ah.

Qaybta 5aad: Kharashaadka Waxaa Xaddidaya Dakhliga

Waxda Khasnaddu waa in ay bixisaa maaliyado ama lacago la kharash-gareeyo oo ku sargo'an dakhliga "**Kaalmada Mileteriga DFS**" ee ka socota Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa laga heli karaa Dowlad-Goboleedka ee Galmudug Qasnadda Koontada kaliya- Miisaaniyadda joogta ah ee kharashka ku baxa.

Qaybta 6aad: Wax ka beddelidda Qaddarka/Tirada Lacagaha La Ansaxiyey

Khasnajiigu waxaa uu qaddarada/tirooyinka lacagaha la ansaxiyey u kala wareejin karaa qaybaha miisaaniyadda ee Wasaarad ama Wakaalad/Hay'ad Leedahay ee ku jira Jadwalka 1aad ee Xeerkan, waa marka dib-u-qoondeyntu aaney ka badneyn, wadar ahaan, 10% qaybta wax laga qaadayo. Lacagaha loo kala wareejinayo Wasaaradaha

Waxaan saxiixay oo aan shaabadeeyey maanta oo ay taariikhdu tahay ____ (Date)_____ bisha
_____ **NOOFEMBAR** _____ ee sanadka 2017

Mohamed Shiikh Ahmed Maalin
Gudomiye ku-xigeenka Baarlamaanka
Dowlaad Goboleedka Galmudug

**Dowlad-goboleedka
Galmudug ee
Soomaaliya
Wasaaradda
Maaliyadda**



**Galmudug State
of Somalia**

**Wasaaradda Maaliyadda
iyo Horumarinta
Dhaqaalaha**

**Ministry of Finance &
Economic
Development**

Appropriation (FGS Military Assistance) Act 2017 Schedule 1

Year 2017

Ministry/Agency		Account		Budget
Code	Name	Code	Name	
04	Ministry of Internal Security	211105	Security Forces (Police, Intel Forces and Prison)	520,000
		211201	Regular Food Provision	270,000
		222301	Gasoline	60,000
		222501	Maintenance of equipment	50,000
		222405	Security Operational Allowance	70,000
		273201	Medical Treatment	30,000
04				1,000,000